

Geedi-Socodka

LOOGU TALAGALAY QOYSASKA HAYSTA
CARUURTA NAAFADA AH, EE DA'DOODA
3-21 SANO
ISKU DIYAARINTA SAFARKA WADADA



- Riix astaamahaan oo dhan si aad u hesho macluumaadka khuseeya ee aad uga baahan karto safarkaaga.



Lifaaqa mardhow ayuu imaanayaa!



Fasalada 6-8

Degmo dugsiyeedyada waxaa laga doonayaa inay abuuraan qorshe guul oo loogu talagalay ardayda halista ugu jira inay dugsiya iskaga haraan, ayadoo lagu saleynaayo siyaasada la-talinta xirfadaha dugsiya.



Fasalka 9aad

Degmo dugsiyeedyada waxaa laga doonayaa:

- inay abuuraan ayna joogteeyaan qorshaha qalanjabinta ee loogu talagalay dhammaan ardayda u gudbaysa fasalka 9 ilaa fasalka 12
- inay waalidka sanad walba u sheegaan halis ku aadan in ardaygu halis ugu jiro inuusan u qalmin shahaadada dugsiya sare.



Goobta Adeegga ee 2



17 Sano Jirada

Degmo dugsiyeedku waa inuu adiga iyo cunugaaga u sheego xogaha ku saabsan wareejinta xuquuqaha kadib marka ilmuhu gaaro da'da 18 sano.



Cunugaagu wuxuu gaaray heerka dugsiya sare

Degmo dugsiyeedyada waxaa laga doonayaa xog kooban oo ku saabsan horumarka

1

Fasalada PK-5

Marna arrin lagu degdegay ma noqonaysa in lagu fakaro rajada iyo riyoooyinka aad leedahay cunugaaga; eeg geedi Socodka ilmaha yaryar si aad u hesho xog dheeraad ah.



2

Sanad Jirsashada 14 sano

Degmo dugsiyeedyada waxaa laga doonayaa inay abuuraan Qorshe Kalaguur oo la xariira IEP-da dhaqangeli doonana marka ilmuhu gaaro 14 sano ama kasii yar haddii ay habboon tahay. Dadka reer Ohio ee naafada ah waxay u qalmaan inay codsadaan adeegyada dib u baxnaaninta xirfadaha ee leh Fursadaha looguna talagalay dadka reer Ohio ee Naafada ah



3

4

Goobta Adeegga 1



5

16 Sano Jirada

Haddii ilmahaaga helo adeegyada naafada ee Guddiga Hormarka, waxaa dib u eegis lagu sameyn doonaa waqtigaan u qalmida.



6



7

18 Sano Jirada

Ardaygu wuxuu xaq iyo masuuliyad u leeyahay inuu sameeyo doorashooyin sharci iyo ku waxbarasho ahaaneed oo ay waalidiintu horey u sameeyeen, sida ansixinta barnaamijka waxbarashada shakhsi ahaaneed IEP.

8

22 Sano Jirada

Shaqsiyaadku mar dambe xaq uma lahaan doonaan waxbarashada guud ee ku habboon ee bilaashka ah (free appropriate public education, FAPE) ee hoos timaada Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada ah (Disabilities Education Act, IDEA) ee Ohio.



Geedi-Socodka

LOOGU TALAGALAY QOYSASKA HAYSTA
CARUURTA NAAFADA AH, EE DA'DOODA
3-21 SANO



ISKU DIYAARINTA SAFARKA WADADA

KU DIYAARINTA WAXYAABAHA MUHIIMKA AH SHANDADA

Sida safar kasta oo wanaagsan, qorshayntu waxay kaa caawin kartaa inaad sameyso wax badan oo la xariira waxyaabaha aad rabto inta aad jidka ku jirto iyo inaad ku raaxaysato raacitaanka gaadiidka. "Shandadaada Kala-guurka" waxay leedahay webseedkyo badan, agab, iyo qalab ka caawinaya adiga iyo cunugaaga u diyaar garoowga nolasha dugsiga sare kadib. Intaad isku diyaarinaysa safarkaaga kala-guurka, isticmaal shandadaada iyo geedi socodkaan Kala-guurka si ay kaaga caawiyaan inaad u jihaysato waxyaabaha aad hiigsanaysa. Markaad raacdo Geesi socodka Kala-guurka, waa inaad si wanaagsan ugu diyaargarowdaa ka bixida dugsiga ee cunugaaga iyo sii wadida nolasha dugsiga sare kadib.

- [Agabka xogta Hay'ada](#) - Agabka xogta Hay'ada waa agab xog oo laga helo macluumaadka muhiimka ah iyo xogaha ku saabsan hay'ada muhiimka ah ee gacanta ka geysta xaaladaha dhallinta ee la xariira u wareegida nolasha qaangaarimada. Agabka wuxuu muhiim u yahay dhallinta, qoysaskooda, dugsiyada, iyo hay'ada.
- [Hagida Qaabdhismeedka Xiriirada Xirfada ee loogu talagalay Waalidiinta](#) - Qaabdhismeedka Xiriirada Xirfada waa hage qoysaska looga caawiyo inay yeeshaan saameyn ayna guriga ku dhistaan xiriirada xirfadaha.
- [Jadwalka Koorsada Nolasha LifeCourse](#) - Jadwalka Qaab dhismeedka LifeCourse waa agabyo kooxo ah oo ay isticmaalaan shaqsiyaadka naafada ah iyo qoysaskooda, inay u diyaariyaan fikradaha, yoolalka, iyo hiigsiyo, iyo sidoo kale dhibaataada-si ay u xaliyaan, wax oga qabtaan, ayna u doodaan helida taageero.
- [Disability Benefits 101](#) - Disability Benefits 101 waxay kusiinayaan agabyo iyo macluumaad ku saabsan shaqaaleysiinta, caymiska caafimaadka, iyo dheefo. Shaqsiyaadku waxay baran karaan sida loo shaqeeyo loona helo dheefo sidoo kale.
- [Qorshaha Kalaguurka Waqtiga Hore](#) - Qoysaska haysta dhallaanka iyo iskaashada waxay ka fakaraan waxyaabaha ku saabsan qaangaarimada, waxayna si qoto dheer ilmaha yaryar ugu diyaariyaan waxyaabaha nolasha ee ka horeeya. Eeg bartaan si aad u hesho xogo, taageero iyo hawlaha gacanta siin doonaa ilmaha yaryar ee ardayda ah si looga caawiyo sidii ay ku bilaabi lahaayeen ka fakarida waxa ay ka dhigan tahay nolasha dadka waawayn ee dhan walba ka buuxda.
- [Lataliyayaasha Waalidka](#) - Lataliyayaasha Waalidka ah ee reer Ohio ayaa diyaar u ah inay ka caawiyaan qoysaska inay fahmaan nidaamka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada carruurtooda. Webseedka Mashruuca Latalinta Waalidka ee Ohio oo ka socda Ohio State University iyo Waaxda Waxbarashada Ohio, waxaad ka heli doontaa khariirad muujinaysa macalimiinta waalidka ah ee Ohio, muuqaalo iyo qalabyo si ay gacan uga geystaan socodsiiinta nidaamka waxbarashada gaarka ah, iyo agabka wax lagu barto guriga.
- [Isbahaysiga Ohio ee Waxbarashada Caruurta Naafada ah](#) - Isbahaysiga Ohio ee Waxbarashada Carruurta Naafada ah (Ohio Coalition for the Education of Children with Disabilities, OCECD) waa urur caalami ah oo aan faa'ido doon ahayn oo u shaqeeya qoysaska haysta ilmaha yaryar, kuwa socod baradka ah, carruurta iyo dhallinta naafada ah ee kunool Ohio, macalimiinta iyo hay'adaha adeegyada siiya.
- [Kooxda Taageerada Gobolka ee Ohio Department of Education](#) - Iyadoo qayb ka ah Nidaamka Taageerada Gobolka oo dhan, Kooxda Taageerada Gobolka waxay iskaashi la sameeyaan dugsiyada, qoysaska, hawlwadayaasha gobolka iyo Waaxda iyadoo loo maraayo nidaamka horumarinta joogtada ah si loo hubiyo in cunug kasta oo Ohio ku nool uu helo waxbarasho tayo sare leh.
- [Rise Up](#) - Rise Up waa hage ay soo saartay laanta Xuquuqda Naafada Ohio (Disability Rights Ohio, DRO) ee loogu talagalay dhallinyarada kujira da'da kala guurka laga bilaabo 14 ilaa 21 sano. Hagahaan wuxuu leeyhaay macluumaad waxtar leh oo ku saabsan xaaladaha shaqsiyaadka ay mari karaan marka ay noqdaan dad waawayn.
- [STABLE Account](#) - A STABLE account waa akoon maalgashi oo ay heli karaan shaqsiyaadka naafada ah ee xaqa u leh. STABLE Account wuxuu kuu oggolaanayaa inaad lacag ku kaydsato oo aad maalgeliso adoon lumin u qalmitaanka barnaamijyada dheefaha dadwaynaha qaarkood, sida Medicaid ama Dakhliga Amniga Dheeraadka ah (Supplemental Security Income, SSI). Dakhliga ku jira akoonkaaga STABLE kuma xirna cashuurta dakhliga dawladda dhexe, ilaa inta aad ku kharash garaynaysa [kharashyada naafada ee u qalma](#).
- [Xarunta Ka qaybgalka Qoyska ee Guud ahaan Gobolka](#) - Xarunta Ka qaybgalka Qoyska ee Guud ahaan Gobolka waxay kor u qaadaa ardayda, waalidiinta, daryeel bixiyaasha, hogaamiyaasha dugsiga, iyo hawlwadayaasha bulshada si ay u abuuraan cilaqaad togan oo soo jiidanaya midba midka kale si loo taageero guusha waxbarashada ee ardayda fasalka xanaanada-ilaal fasalka 12aad.

DIB UGU LAABASHADA GEEDI-SOCODKA

Geedi-Socodka

LOOGU TALAGALAY QOYSASKA HAYSTA
CARUURTA NAAFADA AH, EE DA'DOODA
3-21 SANO



Cunugaagu wuxuu dhigtaa fasalada PK-5

Marna arrin lagu degdegay ma noqonaysa in laga fakaro iyo ka hadlida arrimaha ku saabsan waxyaabaha aad ka rajaynaysa nolasha cunugaaga.

- Waxbarashada hore ee dhallaanka, ee loo yaqaan EI, waa nidaam gobolka oo dhan kajira oo siiya adeegyo la isku dubariday waaliinta dhalay carruurta xaqa u leh ee ka yar da'da 3 sano ee la kulma dib u dhaca koritaan ama naafada ah. EI waa qayb kamid ah nidaamka taageerada ee Help Me Grow. Adeegyadaan iyo taageeradaan loogu talagalay dadka naafada koriinka waxaa lagu bixiyaa heer degmo waxaana bixiya guddiga naafada koriinka ee degmadaada (CBDD). CBDD ayaa go'aamisa u qalmitaanka, oo qiimeysa baahiyahaaga, waxayna isku dubaridaa adeegyada sida ugu fiican kuu taageeri kara. Guji lifaaqaan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan [u qalmitaanka waxbarashada hore ee dhallaanka](#).
- Ohio Department of Education waxay sidoo kale abuuraysaa geedi socodka dhallaanka si cunugaaga da'daan yar looga caawiyo waxbarashada. Tixraac webseedka Waaxda dhowr billood gudahood si aad u aragto agabkaan cusub.
- Ohio Department of Education waxay leedahay agabyo taageeraayo qoysaska iyo dugsiyada [qorshaha kalaguurka dhallaanka](#). Tusaale ahaan, agabka sida [Jadwalka LifeCourse](#) wuxuu qoysaska ka caawin karaa ka hadlida arrimaha ku saabsan kalaguurka.



Cunugaagu wuxuu dhigtaa fasalada 6-8

- Qorshaha [Guusha Ardayga](#) waa nidaam arday oo diirada saaraya ee lagu taageerayo ardayda iyo qoysaskooda si ay u fahmaan shuruudaha akadheemiga si loo gaaro yoolka shaqada. Haddii cunugaagu halis ugu jiro inuu ka tago dugsiga, degmo dugsiyeedka cunugaaga ayaa laga rabaa inay abuurto Qorshaha Guusha Ardayga.
- Kahor inta aysan degmo dugsiyeedku abuurin Qorshaha Guusha Ardayga, waa inay kugu casuumaan kulan kaa caawinaya horumarinta qorshaha. Degmo dugsiyeedku waa inay sidoo kale kula wadaagtaa Qorshaha Guusha Ardayga cunugaaga kadib marka la sameeyo.



[DIB UGU LAABASHADA GEEDI-SOCODKA](#)

Geedi-Socodka

LOOGU TALAGALAY QOYSASKA HAYSTA
CARUURTA NAAFADA AH, EE DA'DOODA
3-21 SANO



Ilmahaaga wuxuu jirsanayaa da'da 14 sano

- Degmo dugsiyeedka cunugaagu waa in ay u abuurtaa qorshaha kala guurka cunugaaga, Qaybta 5 aad ee [Barnaamijka Waxbarashada Shakhshi ahaaneed \(IEP\)](#).  
- Degmo dugsiyeedkaaga waxay aburi doonaan macluumaad ku saabsan cunugaaga ayadoo loo maraayo [qiimeynta kalaguurka ee ku habboon da'da \(AATA\)](#). Macluumaadkaan waxaa kamid ah dookhyada cunugaaga, danaha, baahiyaha, iyo awoodaha - Macluumaadkaan waxaa mararka qaar loo yaqaan PINS.
- Degmo dugsiyeedka cunugaaga waa inay isticmaashaa macluumaadka lagu soo uruuriyay nidaamka AATA si ay u abuurto qorshaha kala guurka. Qorshaha kala guurka cunugaaga waxa kujiri doona macluumaadka ku saabsan waxyaabahaan soo socda:
 - adeegyada kala-guurka,
 - koorsada(ooyinka) waxbarashada,
 - yoolalka dugsigu sare kadib ee la xariira tababarka iyo waxbarashada
 - Yoolalka dugsigu sare kadib ee la xariira xirfadaha nolasha ee madaxa banaan (haddii ay habboon tahay), iyo
 - Yoolalka dugsigu sare kadib ee la xariira shaqaaleysiinta isku dhafka ah ahna tartanka.




Cunugaagu wuxuu galayaa fasalka 9aad

- Laga bilaabo fasalka 9aad ilaa qalin jabinta, dugsigu cunugaaga waxa looga baahan yahay inuu la shaqeeyo cunugaaga (iyo inuu kugu martiqaado nidaamka) si loo horumariyo [qorshaha qalin jabinta dugsigu sare](#).
- Waxaa jira shuruudo badan oo looga baahan yahay ardaydu si ay oga qalan jabiyaan dugsigu sare. Qorshaha qalin-jabinta waa inuu qiimeeyaa waxa cunugaaga u baahan yahay inuu sameeyo si uu u buuxiyo shuruudahaas. Maadaam qorshaha sanad walba la cusboonaysiiyo, waa in lagu qoraa guusha cunugaaga (ama la'aanta) ilmahaaga ee buuxinta shuruudaha qalin-jabinta. Haddii cunugaagu halis ugu jiro inaanu qalin jabin sababo la xariira ah inuusan kasoo bixin mid ama in ka badan oo kamid ah shuruudaha, degmo dugsiyeedku waa inay ku ogeysiyaan.

[DIB UGU LAABASHADA GEEDI-SOCODKA](#)

Geedi-Socodka

LOOGU TALAGALAY QOYSASKA HAYSTA
CARUURTA NAAFADA AH, EE DA'DOODA
3-21 SANO



GOOBTA ADEEGA I

Aagga Adeegga ee ugu horeeya waxaa laga helaa macluumaad si gaar ah ugu habboon cunugaaga jira 14 ka sano. Lifaaqa koowaad wuxuu ku geyn doonaa hagaha qorsheynta ee Qiimaynta Kala-guurka ee Da'da ku Haboon (waxaa laga yaabaa inaad maqasho arrintaan loo yaqaan AATA). Qiimaynta kala-guurka ee ku habboon da'da ayaa muhiim u ah ka caawinta cunugaaga inuu helo waxbarashada, tababarka, iyo taageerada uu u baahan yahay si uu u horumariyo aqoonta iyo xirfadaha ka caawin doona inuu gaaro yoolalka nolashiisa. Lifaaqa labaad, liiska hubinta ee Muujiyaha 13 aad, wuxuu ku siinayaa su'aalo kugu lagi kara adiga iyo kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee cunugaaga (IEP) si loo go'aamiyo haddii ay jiraan yoolal ku haboon dugsiga sare kadib dhinacyada tababarka, waxbarashada, shaqada, iyo xirfadaha nolosha ee madaxa banaan. Agabkaan ayaa kaa caawin kara inaad taageerto cunugaaga maadaama uu isku diyaarinaayo nolosha dugsiga sare ka dib.

- [Hagaha Qorshaha Qiimeynta Kala guurka ee Da'da Ku habboon](#)
- Liisk Hubinta ee Muujiyaha 13 aad - *(Lifaaqa waa la heli doonaa)*



Cuunugaagu wuxuu jiraa 16 sano

- Marka cunugaagu jirsado 16 sano, haddii cunugaagu uu xaq u lahaa adeegyada hoos yimaada guddiga degmada ee naafada kobaca, u qalmiitaankiisa kuma salaysna qalabka Go'aaminta Xaq u yeelashada Carruurta Ohio (Children's Ohio Eligibility Determination Instrument, COEDI). U qalmiitaankooda hadda waxaa lagu go'aamiyaa Qalabka Go'aaminta U qalmiitaanka Ohio (Ohio Eligibility Determination Instrument, OEDI). Haddii cunugaagu helay adeegyadaan aadna rajaynayso inuu sii wato, [Hagaha Isticmaalaha ee OEDI](#) ayaa kaa caawin kara hawsha.

[DIB UGU LAABASHADA GEEDI-SOCODKA](#)

Geedi-Socodka

LOOGU TALAGALAY QOYSASKA HAYSTA
CARUURTA NAAFADA AH, EE DA'DOODA
3-21 SANO



GOOBTA ADEEGGA EE 2 AAD

Aagga adeegga ee labaad wuxuu leeyahay labo lifaaq oo bixiya macluumaad ku saabsan helida Aqoonsiga Ohio iyo ruqsada darawalnimada. Kaararka Aqoonsiga sawirka leh waxaa loogu talagalay aqoonsi ahaan oo kaliya waxayna gacan ka geysan karaan in la helo cunugaaga, haddii uu mar uun dhumo. Ma jirto da' laga reebo kaarka aqoonsiga Ohio. Oggolaanshaha ruqsada darawalnimada ee ku meel gaadhka ah waxa la heli karaa marka uu ilmuhu jiro 15 ½ sano waxaana la heli karaa shatiga tijaabada ah lix bilood ka dib marka la helo oggolaanshaha ruqsada darawalnimada.

- [Aqoonsiga Gobalka](#)
- [Shaatiga Ruqsada Darawalnimada](#)



Cuunugaagu wuxuu jiraa 17 sano

- Da'da qaan gaarnimadu waa da'da qofka loo arko qof weyn inuu yahay. Da'da qaangaarnimada Ohio waa 18.
- Ugu yaraan hal sano kahor inta uusan cunugaagu gaarin da'da qaan gaarnimada, degmo dugsiyeedku waa inay ku wargeliso adiga iyo cunugaaga in xuquuqda IDEA lagu wareejin doono ilmahaaga marka uu gaaro 18 sano. IEP-da cunugaaga waa in uu muujiyaa in adiga iyo ilmahaaga lagu wargeliyay xuquuqdiina. Degmo dugsiyeedkaagu waxaa waajib ka saaran in dhamaantiin aad sii wadataan taageerada cunugaaga marka uu jiro 18 sano hadii loo baahdo.

[DIB UGU LAABASHADA GEEDI-SOCODKA](#)

Geedi-Socodka

LOOGU TALAGALAY QOYSASKA HAYSTA
CARUURTA NAAFADA AH, EE DA'DOODA
3-21 SANO



Cuunugaagu wuxuu jiraa 18 sano

- Cunugaagu wuxuu xaq u leeyahay waajibna ku ah inuu sameeyo qaar kamid ah dookhyada waxbarashada iyo sharciga ee asaga la xariira.



Cunugaagu wuxuu gaaray heerka dugsiga sare

Cunugaagu wuxuu diyaar u yahay inuu u jiheysto safarka qaangaarnimada. Shandadooda waxaa ka buuxa agabka lagu taageerayo socdaalkooda.

- Marka cunugaagu qalan jabiyo ama ka baxo dugsiga sare, degmo dugsiyeedyada cunugaaga waa inay bixiso [xog kooban oo ku saabsan tacliinta iyo waxqabadka shaqada cunugaaga](#). Xogtaan kooban waa inay soo kale ku jiraan soojeedinada ka caawin kara cunugaaga inuu gaaro yoolalka dugsiga sare kadib.
- Waxaad taageeri kartaa guusha cunugaaga ee dugsiga sare ka dib adiga oo ka caawinaya inuu horumar ka sameeyo tallooyinka la siiyay.



Cuunugaagu wuxuu jiraa 22 sano

- Cunugaaga hadda uma qalmo waxbarashada Dadwaynaha ee ku habboon ee bilaashka ah (free appropriate public education, FAPE) ee hoos timaada Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA). Haddii cunugaagu 22 jirsado inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka, siyaasadda degmo dugsiyeedka ayaa go'aamin doonta haddii ilmahaagu uu sannad dugsiyeedka ku dhameysan karo degmada.

[DIB UGU LAABASHADA GEEDI-SOCODKA](#)